Dabaylaha Jiilaalka Maxaad fali kartaa

- Ogsoonow Snow Map (Khariidadda Barafka).
- Dhegeyso saadaalinta jawiga. Lahow ku talogal haddii ay dhacaan xannibaado jawiga qallafsan awgeed.
- Hubso inaad haysato dhalaaliso iyo firdhiso baraf.
- Hadday dabaylo xooglihi dhacayaan, ha kaxayn gaadhi haddaadan ku qasbanayn. Gawaadhida oo ku yar waddooyinka intay dabayluhu socdaan iyo markay go'aan ka dibba, waxay fududaysaa in waddooyinka la nadiifiyo, waana lagu badbaadaa.
- Adeegso baska. SDOT waxay si dhow ula shaqeeyaan Metro Transit si ay u xaqiijiyaan in basasku waddooyinkay marayaan ay furnaadaan.
- Haddii aad ku khasbantay inaad gaadhi ku baxdo, hubso in gaadhigaagu diyaar u yahay jawiga. Ha illaawin silsiladaha barafka, una diyaar ahow inaad ku xidho haddii loo baahdo. Hubso in daaqaduhu nadiif yihiin, islamarkaana barafka laga wada masaxay gaadhiga oo dhan.
- Qunyar soco, u jir fogaan badan gaadhiga kugu xiga, una diyaar ahow inaad si fiican wax u arki waydo oo barafku kaa qariyo, gaar ahaan biriishyada iyo dallacadaha waddoonyinka.
- Fiirso oo ha ku xadgubin astooyinka "Street Closed" (waddo xidhan). Boolisku waxa uu u dhigay si aad ugu badbaaddo.



Kaalo iyo xog-ogaalba waxaad ka heli

Seattle Department of Transportation
Teleefonka degdegga (206) 386-1218

Kala soco SDOT Twitter amase Facebook
Kusoo xidhan mareegaha On the Move iyo SDOT halkan www.seattle.gov/transportation/winterweather.htm

King County
Dayactirka waddoonyinka (206) 296-8100
www.metrokc.gov/kcdot/roads/default.aspx
Xogta fardafuulka (206) 553-3000
http://metro.kingcounty.gov

Seattle City Light
Teledoonka gargaarka ee maqnaanshaha laydhka (206) 684-7400
www.seattle.gov/light

Washington State Department of Transportation
Xaaladda waddoonyinka kala hadal 511
www.wsdot.wa.gov/traffic

Sound Transit Xogta Fardafuulka
1-(888) 889-6368
www.soundtransit.org

Seattle Public Schools
(206) 252-0207
www.seattleschools.org/area/main/snow.htm

Xogta oo ku dhigan af aan ingiriisi ahayn
www.seattle.gov/transportation/winterweather.htm

Maxaa laga sheegay Snow (Barafka) Map (Khariiraddu) waxay sheegtay

Khariiraddani waxay ku tustaa waddooyinka iyo heerka adeegsigooda. Dariiqyadu waxay ku tusi waddooyinka ugu mashquulsan ee isku xidha agagaarkeenna iyo badhtamaha magaalada amase gobolka wayn ee Puget Sound; waddooyinka ay adeegsanayaan hay'adaha isu socodka, gaar ahaan marka uu jawi xumi jiro; waddooyinka ay adeegsadaan hay'adaha gargaarka degdegga ah; iyo waddooyinka muhiimka uu ah dadwaynaha sida iskuullada, jaamacadaha iyo dhakhtarrada, iyo waliba goobaha shaqada ee muhiimka ah ee Seattle's. Xusuusnow, SDOT ma carrotuusho waddooyinka yaryar.

Maxaa laga sheegay Snow (Barafka) Map (Khariiraddu) waxay sheegtay

Khariiraddani waxay ku tustaa waddooyinka iyo heerka adeegsigooda. Dariiqyadu waxay ku tusi waddooyinka ugu mashquulsan ee isku xidha agagaarkeenna iyo badhtamaha magaalada amase gobolka wayn ee Puget Sound; waddooyinka ay adeegsanayaan hay'adaha isu socodka, gaar ahaan marka uu jawi xumi jiro; waddooyinka ay adeegsadaan hay'adaha gargaarka degdegga ah; iyo waddooyinka muhiimka uu ah dadwaynaha sida iskuullada, jaamacadaha iyo dhakhtarrada, iyo waliba goobaha shaqada ee muhiimka ah ee Seattle's. Xusuusnow, SDOT ma carrotuusho waddooyinka yaryar.

Iskubeegidda iyo la shaqaynta Habka Basaska

SDOT iyo King County Metro Transit waxay u wada shaqeeyeen si taxaddir badan leh sidii ay waddooyinka barafka ee SDOT's u raalli gelin lahaayeen isu socodka dadwaynaha. Waddooyinka barafku waxay si beegaal ah uga ra'yi bixinayaan siday Metro u shaqayn doonto haddii baraf yimaaddo.

Dabaylaha Jiilaalka
Waxa aynu u nahay diyaar

Halkan Seattle, jiilaalku wuxuu la iman karaa roobab laxaad leh, dabaylo sarreeya, baraf iyo ceeryaamo. Diyaar ayaynu u nahay.

Magaalada Seattle waxay ku dhaqaaqaysaa hab cusub. Inta aanu bilaabmin in barafku soo dhaco, waxa aanu farsamayn doonnaa waddooyinka muhiimka ah si aanu baraf badani ugu fadhiisan. Marka barafku dhacayo waxaanu diyaar ku ahaan doonnaa halkaas si aanu sida ugu wanaagsan ee suurogalka ah waddooyinka u bannayno.

SDOT waxay isha ku haysaa jawiga cimilada ee Seattle's 24 ka saacadood ee maalin kasta, sannadkoo dhan toosna ugu xidhan tahay National Weather Service (adeegga qaranka ee cimilada) iyo raadaar si toos ah ugu soo gudbiya xaaladda jawiga. Waxaanu leenahay soo gudbiyeyaal kombiyuuter ku xidhan oo waddoonyika warka kasoo laliya si toos ah, iyo waliba kamarado dhijital ah oo ku xidhan waddoonyinka lama huraanka ah, iyo waliba GPS (habka meelaynta satelaytka) si aanu u hagno gawaadhida barafka riixa ee banneeya waddooyinka.



Markay dabaylahu innagu soo aaddan yihiin
Waxa aynu u nahay diyaar

Waxaynu carrotuul ka difaacnaa waddooyinka muhiimka ah. Tani waa dariiqyo fure u ah gawaadhida gargaarka degdegga, gawaadhida dadwaynaha iyo wixii la xidhiidha waddooyinka. Ma carrotuuli doono waddooyinka yaryar.

- Waxaannu bilaabnaa in loo diyaar garoobo Jiilaaka xilliga xagaaga: tababarka shaqaalaha, diyaarinta qalabka iyo la shaqaynta hay'adaha degaanka.
- Marka la sheego in baraf imanayo waxaanu diyaarinnaa gawaadhida waawayn ee sii diyaariya waddooyinka wadnaha ah iyo biriishyada sidii barafka loo dhalaalin lahaa.
- Marka dabaylaha duufaanka wata amase roobab laxaad leh, shaqaalahayagu waa uu diyaar inay ka qaadaan wixii dhir ah ee ku dhaca waddooyinka, isla markaana inay toosiyaan oo hagaajiyaan astooyinka waddooyinka.

Markay dabayluhu dhacayaan
Waxa aannu u haynaa hab cusub

SDOT waxay si dhow ula shaqeeyaan King County Metro, Maamulka Iskuulada Gobolka ee Seattle, jaamacadaha degaanka, dhakhtarrada iyo hay'adaha shaqo ee waawayn si ay gawaadhidayada ka hortagga barafku u caawin lahaayeen sidii dadka iyo alaabadu u kala socon lahaayeen ee gobolka loosoo gali lahaa loogana bixi lahaa. Snow Map (Khariiradda Barafku) waxa ku cad meelaha aanu shiishka saari doono si aanu uga hortagno barafka. Waddooyinka waxa lagu samayn doonaa baraf-dhalaalin hadday dabaylo dhacayaanna carrotuul baa lagu samayn. Markaas baa loo samayn doonaa habkii loo mari lahaa shaqada, adeegsiga, xannaanada carruurta iyo ballamaha caafimaad.

Dabaylaha Jiilaalka
Ahow jaar wanaagsan

Adiga qudhaadu waxaad ka mid tahay kooxda! Kaqayb qaadashadaa iyo feejignaantaadu way na caawin karaan.

- Nadiifi gurigaaga hortiisa iyo biyo mareennada iyo caleemaha dhirtaada ka dhaca. Ku rid lamaaha iyo caleemaha sanaaduuqda xashiishka, oo ha ku dhaafin dariiqa.
- Marka barafku dhacayo, fiiq iyo dhalaali barafka aqalkaaga hortiisa. Waxaad adeegsan kartaa cusbo (milix) sida aannu annaba samayno. Carruurta, dadka waayeelka ah iyo booswalahaaguba way ku farxi doonaan taas, kuguna tixgelin doonaan. Haddii aad jaar la tahay cid waayeel ah, ka feker inaad u nadiifiso iyagana. Haddii cid waliba horteeda nadiifiso, waxay waddaas yari anfaci in ilaa dukaanka wax lagaga soo iibsado oo la maro, ama loo maro ilaa baska halka laga raaco.
- Nadiifi baraf ururintaada. Waxay fududayn doontaa in si fudud loo qaado.
- Baayacadmushtarka iyo maamulka dhismeyaashu waa inay iska xilsaaraan nadiifinta hortooda iyo goobta basku istaago ee hortooda ah, si dadka waxkasoo iibsanaya iyo shaqaalihu ay u iman karaan.
- Baraf riixayaashu waxay barafka u riixi doonaan dhinaca dadku maraan. Marka baabuurtu ku jirta jidka barfaka loo riixayo waa inay barafka iska riixaan.

Baro oo ogsoonow Snow Map (Khariiradda Barafka)

Waddooyinka